

Fahmida qorshaha cusub ee doorashada dugsiiga ee Guriga-kusaleysan

Laga bilaabo Jeneweri, 2014 xafiiska Dugsiyada Dadweynaha Boston (BPS) wuxuu isticmaali doonaa qorshe cusub oo lagu meeleynayo dugsiiga oo ah **qorshe Guriga-kusaleysan** ee ardayda fasallada kindergarten illaa siddeedaad. Qorshan waxa abuuray guddi dibadda ah oo kumuyuunatiguna wax bay ku darsatay, qorshahan cusubi wuxuu tirtirayaa saddexdii soon ee waaweynaa (large zones) oo wu wuxuu ardayda ka caawin doonaa inay galaan dugsiyo tayo leh oo guriga ku dhow. Sannadkiisa koowaad, qorshuhu wuxuu u adeegi doonaa ardayda fasallada kala-guurka (transition grades): K0, K1, K2, iyo 6, oo fasallo dheeraad ah waxa lagu dari doonaa sannad kasta oo dembe. Dugsiyada sare waxay sii ahaan doonaan kuwo ardayda maagalada oo dhan ay dooran karaan.

Qorshaha Guriga-kusaleysan wuxuu:

- Dheereyaa jaaniska uu goys u helo mid ka mid ah doorashooyinkii dugsi ee u sarreeyey
- Dheereyaa sinnaanta loo wada leeyahay gelidda dugsiyada tayada leh guud ahaan
- Hubiyaa in arday kasta oo soo galaya fasalka kindergarten uu yeesho dugsiyo tayo sare ah oo uu kala doorto
- Jaraa illaa boqolkiiba 40% masaafada celceliska ah ee ilmuhu u safro dugsiiga
- Walaalaha siiyaa mudnaan si loo caawiyo in walaaluhu dhigtaan dugsi isku mid ah
- Bixiyaa doorashooyin dheeraad ah oo ah magaalada oo dhan ee dhammaan qoysaska, oo Dugsiyada hoose ku xiraa dugsiyada dhexe si ah dariiqooyin mutadawacnimo ah.

Qorshaha Guriga-kusaleysan wuxuu guriga ardayga u isticmaalaa barta bilowga ah.

- Waxaannu bixin doonnaa **liis loogu talagalay** ee doorashooyinka dugsiyada ee goys kasta iyadoo lagu saleynayo cinwaanka gurigooda. Liiska waxa ku jira dugsi kasta oo hal meyl u jira guriga dhinac kasta, sida loogu baahdo, iyo dugsiyada u dhow ee leh heerarka waxqabad ee u sarreeya ee imtixaanka MCAS iyo kobacoodaba. Taasi waxay hubisaa in qoys kastaaba uu heli karo dugsiyo tayo sare leh, iyada oo aan loo fiirin in meesha ay ku nool yihiin.
- Waxa laga yaabaa oo kale in liisku sii koro, sida loogu baahdo, si loogu daro dugsiyaga bixinaya K0, Fasalka Barashada Sare (AWC), iyo in la hubiyo inaan ilma kasta siinno kursi ku yaalla dugsi ku jira liiskiisa/liiskeeda. Dugsiyada waxa loogu yeeri doonaa “Dugsiyada Doorashada.”
- Qoys kastaa wuxuu yeelan doonaa ugu yaraan lix dugsi oo ay kala doortaan; intoodan badani waxay heli doonaan celcelis ahaan 8-14 doorasho.
- Qoysasku waxay kaloo dooran karaan dugsi kasta oo ka dhaxeeya magaalada oo dhan.
- Qorshaha Guriga-kusaleysan waa mid bakhtiyaa-nasiib ah; sidaas darteed annagu ma ballan qaadi karno in codsade lagu meeleeyo mid ka mid ah doorashooyinkiisa u sareeya. Iyadoo ay sababtu tahay kuraasta xaddidan, annagu ma ballan qaadi karno meeleynta fasallada K0 ama K1, sidii ay hore u ahayd. Ardayda codsata fasallada kindergarten, grade 6 iyo 9 bisha Jenerweri ayaa heli doona jaaniska ugu fiican ee lagu meeleeyo dugsiiga ugu sarreeya doorashadooda.

Qorshaha Guriga-Kusaleysan waxa loo habeeyey in la hubiyo in qoys kastaa uu yeesho dugsiyo tayo sare oo ku yaalla liiskooda loogu talagalay. Dugsiyadeenna waxaannu u kooxeynay afar **qeybood oo MCAS** ah oo ku saleysan waxqabadkii ardayda ee imtixaanka MCAS ee labadii sannadood ee tagay. // Qoys kasta waa inuu yeeshaa ugu yaraan laba ah dugsiyada ugu buundo sarreeya “highest-scoring schools (Tier I – the top 25%)” iyo afar dugsi oo ugu yaraan ku jira nuska sare ee waxqabadka MCAS performance (Tier I and Tier II) oo ku jira liistooyinka iyaga loo qoray “customized lists”. // Waxaannu ognahay in qoysasku ay fiirin doonaan qoddoba kale oo badan oo ka baxsan MCAS ka marka ay go’aansanayaan inay dugsi doortaan, oo waxa kale oo aannu komuyuunatiga kala shaqeyneynaa inaanu kobcino qiyaas kale oo tayo muddo dheer ah oo tii hore ka fiican.

MCAS TIERS	
TIER I Dugsiyada Boqolkiiba 25%	<i>Ugu Waxqabadka Sare ee MCASka</i>
TIER II Ka sarreeya 50%	
TIER III Ka Hooseeya 50%	
TIER IV Dugsiyada Boqolkiiba 25%	<i>Ugu Waxqabadka Hooseeya ee MCASka</i>

Ardayda ah Bartayaasha Luqadda Ingiriisiga iyo kuwa naafanimada leh, qorshaha Guriga-kusaleysan wuxuu u abuuraa kooxo komuyuunatiga ah ee doorashooyinka dugsiiga si loo hubiyo in ardaydu geli karaan dugsiyo bixiya barnaamijyo tayo sare leh oo gurigooda u dhow.

Qorshaha Guriga-Kusaleysan wuxuu bixiyaa sadaal intii hore ka fiican oo wuxuu waalidiinta siiyaa fursad tii hore ka fiican oo ay mar hore ku sii ogaadaan doorashooyinkooda dugsi. Tan macnaheehu waxa waaye in qoysasku ay wax ka sii agaan karaan xilli hore dugsiyada ay kala dooranayaan, taas oo sii xoojin karta isku xirka dugsiyada, ardayda iyo qoysaska. Macluumaad intan dheer oo ku saabsan qorshaha Meeleynta Guriga-kusaleysan waxa aakhirka bisha Sibtember laga helayaa barta internetka ee bostonpublicschools.org. Qoysasku waxa kale oo ay awoodi doonaan inay wax badan ka sii bartaan doorashooyinkooda dugsi ee qorshaha cusub laga bilaabo bisha Nofember xilligayaga Doorashada Dugsiiga.